# Hel midho iyo khudaar bilaash ah

Rugta caafimaadka ee Dugsiga Sare ee Wellstone waxay bilaabaysaa barnaamij lagu helo miro iyo khudaar la geynaayo guryaha ardayda si bilaash ah. Ardayda u qalanta waxay heli karaan miro iyo khudaar loo keenayo labadii toddobaadba mar mudo lix bilood ah.

Maxaad uga qayb qaadanaysaa? Si loo dhiirigeliyo cunto caafimaad leh oo aad heshaan adiga iyo qoyskaagaba!

Si aad isu diiwaangeliso, booqo rugta dugsigaaga (Qolka 3210) si aad u aragto inaad u qalanto oo aad u ogaato xog dheeraad ah. Haddii aad doorato inaad ka qaybgasho, ciwaankaaga iyo lambarka taleefanka ayaa lala wadaagi doonaa ururka bixinaya cuntada. Si kastaba ha ahaatee, macluumaadkaan waa lagu hayn doonaa qarsoodi mana jirto cid lala wadaagi doonno ogolaanshahaaga laa'iintiis.

Wixii macluumaad dheeraad ah,
wac ama qoraal u dir:
612-394-3278

Waxaa suurtogal ka dhigay maalgelin ka timid Centers for Disease Control and Prevention, (Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada), Iskaashiga Hormarinta Caafimaadka ee Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Minnesota), iyo Medica.

Si aad u hesho caawimaado macquul ah ama ugu hesho qaabab kale fadlan la xiriir healthyliving@minneapolismn.gov. Dadka dhegaha la' ama dadka maqalkoodu culus yahay waxay isticmaali karaan adeegga gudbinta si ay uga wacaa 311 lambarka 612-673-3000. Dadka isticmaala TTY waxay wici karaan 612-263-6850. Para ayuda, llame al 311. Rau kev pab 311. Hadii aad Caawimaad u baahantahay wac 311.